Warbixin waalidiinta loogu talagalay

Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed [CPUP] – Dabagal kahortegid ku salaysan ee ilmaha la dhiban curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) ama calaamadaha cudurrada la mid ah

Curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP), waa magaca wadareed oo xiriir la leh curyaamida/naafanimada-maskaxeed ee uu sabab ah dhaawaca maskaxda, ee ku dhaco ilmaha kahor inta ay 2 sano buuxsan. Sababaha curyaamida/naafanimada-maskaxeed way badan yihiin wayna kala duwan yihiin. Sidoo kale, heerarka curyaamida/naafanimada way kala duwan yihiin. Hab-shaqaynta maskaxda ee qaar ilmaha kamid ah way wanaagsan tahay halka kuwa kalena way ka muuqata curyaamida/naafanimada-maskaxeed.

Ilmaha la dhiban curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP), waxay badanaa leeyihiin xiisad aad u sareysa (spasticity) ee muruqyada qaarkood, halka muruqyada kale ay daciifin karaan. Isu dheelitir la'aanta u dhaxeysa muruqyada kala bixiya oona foorariya hareeraha kalagoysyada gacmaha iyo lugaha, waxay u horseedi karaan in muruqyada ay yaraadaan, oona sababaan qallafsanaanta kalagoysyada (kontraktur). Kalagoysyada sinta ee ilmaha qaarkood waxaa dhici karto halista in xiisada murqaha iyo yaraanta murqaha kuwaasoo sababa kala baxa sinta (höftluxation). Dheelir la'aanta murqaha dhabarka waxay sababi karaan qallooca dhabarka (scoliosis). Waayahaan dambe, waxaa la heli karaa siyaabo kala duwan oo lagu daryeelo, kuwaasoo hoos loogu dhigo xiisadaha murqaha, oona looga hortago cilladda habshaqaynta kalagoysyada iyo dhaawaca kalagoysyada sinta, laakin in tallaabo ka qaadista daahid la'aan loogu dhaqaaqo.

Tan iyo dhawr sannadood waxaa wadashaqayn ka dhaxayso, rugaha lafaha iyo goobaha baxnaaniska bukaha ee carruur iyo dhallinyarada ee dalka Iswiidan ku yaalaan. Wadashaqayntooda waxay ku salaysan tahay Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) ee loogu talagalay Ilmaha la dhiban curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) ama calaamadaha cudurrada la mid ah. Maamulka Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister] wuxuu tan iyo 2005-tii uruursha xogta barnaamijka laga soo xigsaday. Dalka oo idil wuxuu imminka ka qaybgala Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP).

Ulajeedada Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) laga leeyahay

Iyadoo la adeegsanayo Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP), ayaa waxaa la doonayaa in la sugo, in ilmaha halis ugu jiro in cilladda habshaqaynta kalagoysyada ama dhaawaca kalagoysyada sinta la shaacbixiyo, oona daahid la'aan la daryeelo. Haddafka waxaa weeyaan in usan jirin ilmo ku dhaca cilladda habshaqaynta kalagoysyada, ama dhaawaca kalagoysyada sinta oo ah noocyada halista ah iyo in cunug kasta u helo hab shaqaynta xubnaha jirka oo heer sare ah.

Sidee baa dabagalka loogu dhaqaaqa?
Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) laga leeyahay, waxaa loogu dhaqaaqa iyadoo kooxda baxnaaniska bukaha ku dhaqaaqaan xaalad-baaris, kaddib hab joogto ah wargeliyaan kartida jir-dhaqaajiska iyo hab-shaqaynta, hab waafaqsan barnaamijka qofka gaar ahaan da' diisa iyo heerka kartida jir-dhaqaajiskiisa loola qabsiyay. Haddii kartida jir-dhaqaajiska ay hooseeyso waxaa la soo horumariya hirgelinta barnaamijka, badi ahaan kahor inta aan la shaacbixin haddii ilmahu u qabo curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) iyo in kale. Markii ilmahu u afar sano buuxsado ayuu dhakhtarku ku dhaqaaqaya qiimaynta, haddii ilmahu u qabo curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) ama in kale, iyo haddii u qabo cudurro kale ama itaaldarro kale. Aqoonyahanka muruqgoynka, Daaweyaha shaqaalaha [Arbetsterapeut] iyo Daaweeyaha cilladda hadalka waxay ku dhaqaaqayaan baaritaanka kartida jir-dhaqaajiska, hab-shaqaynta gacanta, is-gaarsiinta, kartida cunto cunista iyo liqida iyo daawaynta socota, hal ama laba jeer sannadkii ilaa u lex sano ka buuxsado. Markaas kaddib baarintaanka waxaa caadi ahaan lagu dhaqaaqa sannadkii hal mar ama labadii sano hal mar, waynaadaana mararka qaarkood aan sidaas u badnayn.

Dadaal u ururka adeegsateyaasha RBU (Isbahaysiga ilmaha iyo dhallinyarada itaalddarran) iyo curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) ee dalalka Waqooyiga Yurub, waxaa imminka lagu biiriyay qiimaynta Aqoonyahanka cilminafsiga/saykoolojist iyo ka warbixinta hab-shaqaynta kartida wax garashada Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP), ayaa talo ahaan la soo jeediyay in la sameeyo kahor inta ilmaha aynan iskuullada bilaabin iyo markii 12 sano ay buuxsadaan.

Hab joogto ah ayaa raajo laga qaadayaa sinta iyo dhabarka. Haddii iyo sida badi ahaan qof kasta wuxuu u baahan yahay il raajo laga qaado, waxaa go'aankooda iskaleh dhakhtarka lafaha, kaddib markii u aqristo wargelinya Aqoonyahanka muruqgoynka kaddib isku barbardhigay rajada cusub iyo baaritaanadii berri hore la sameeyay. Badi ahaan waxaa talo ahaan la soo jeediyaa hal masawir raajo sannad kasta kahor inta u hal sano cunugga buuxsan iyo rajada dhabarka ilmaha waawayn ilmaha iyo dhallinyarada ku dhaca dhabar-qallooc (skolios).

Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) wuxuu kaalin ka geystay hoos u dhigidda si xumaanshada iyo sare u qaadka tayada daryeel-caafimaadeedka
Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) wuxuu ilaa hadda kaalin ka geystay hoos u dhigista tirada dhaawaca kalagoysyada sinta, tiro aad u hooseeyso ilmaha ku dhacay cilladda habshaqaynta kalagoysyada halista ah ama dhabar-qallooc. Tirada qalliinka lafaha ee cilladda habshaqaynta kalagoysyada hoos ayay u dhacday. Sido kale Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) waxaa wadashaqaynta ka dhaxaso khubara kala duwan xiriir la leh Ilmaha la dhiban curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) sare loo qaaday.

Kooxda Baxnaaniska bukaha ilmaha iyo dhakhattirta waxay iyagoo adeegsanayo Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP), dabagaalaan xaaladda ilmaha waxayna kaddib daahid la ' aan shaacbixiyaan caalamadaha digniinka, waa haddii ay jiraan. Tan waa asaaska suurtagelin karo daryeelida daahid la'aanta ee ilmaha buka.

Dhammaan ilmaha way ka qaybgeli karaan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP). Sido kale, qofku wuxuu xaq ku leeyahay in markii oo doono joojiyo ka qaybgelista barnaamijka.

Ilmaha ka qaybgala Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) waa la diiwan geliyaa, waa haddii codsi kale waalidka laga helin, dhammaan xogta ku saabsan daryeelista kartida hab-shaqaynta iyo natiijada raajada ku qoran waxaa laga diiwan geliyaa Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister]. Iyadoo la soo ururiyay dhammaan xogta Ilmaha la dhiban curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP) ayaa diiwanka tayada kaydka kombyuutarka laga diiwan geliyaa, kaddib waxaa sare u kacayso fursadda hourumarinta iyo sugidda tayada daryeel-caafimaadeedka iyadoo tiro xogta oo badan laysku soo uruurin karo lana qiimayn karo. Xogta uruursan waxay kaalin ka geysan doontaa helida aqoon cusub, oo ku saabsan sida ugu fiican lagu daryeeli kjaro dhibaatooyinka xiriirka la leh curyaanimada/naafo-maskaxeed (CP), iyadoo dalka oo idil laga helo muuqaalka xaalladda oo midaysant. Aqoontaas waxaa loo adeegsan doonaa sidii sare loogu qaadi lahaa tayada hawlaha daryeel-caafimaadeedka ilmaha curyaanimada/naafo-maskaxeed.

Maadaama xogta laga diiwangelin doono diiwanka tayada ee kaydka kombyuutarka, waxaa kooxda daryeel-caadimaadeedka u fududanayso dabagelida horumarka iyo daryeelista ilmaha. Xitaa haddii ilmaha lagu wareejiyo goob caafimaadeed kale, waxaa loola socon karaa daryeelista iyadoo xogta lagu soo wareejiyo kooxda cusub, waa haddii dabcan aan la codsan ciribtirista diiwangelinta xilliga kala guurka.

Kaydka kombyuutarka waa diiwanka tayada qarmeed, waxaana khuseeya sharciga xajinta sirta xifadda ee u degsan goobaha daryeel-caafimaadeedka iyo Hay`adda arrimaha xogta kombyuutarrada ku qoran [Datainspektionen]. Taasoo macneheedu ay tahay in marna suurtagal noqon karin in markii laysku daba-ridi doono xogta wargelin guud la ogaado aqoonsiga cunugga.

Qofku wuxuu xaq ku leeyahay in uu diido diiwangelinta xogta Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister], iyadoo haddana wax saamayn aynan ku yeelan doonin daryeelista iyo dabagalka hab waafaqsan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP). Qofku quxuu kaloo xaq ku leeyahay in xogta isaga ku saabsan laga ciribtiro diiwanka (eeg bogagga ku lifaaqan).

Warbixin dheeraad oo ku saabsan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) waxaad ka aqrisan kartaa warqadaha qoraalka warbixintaan ku lifaaqan iyo barta internetka www.CPUP.se

Warbixin dheeraad oo ku saabsan Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister] waxaad ka aqrisan kartaa www.kvalitetsregister.se

Gunnar Hägglund
La taliyeha dhakhtiirta aqoonta gaarka u leh cudurrada, haayaha diiwanka Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP)
Waaxda daryeelka lafaha. Isbitaalka Skånes Universitetssjukhus. 221 85 Lund
Email: gunnar.hagglund@med.lu.se

Warbixinada kale oo ku saabsan Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister] ee Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP)

Habka xogta Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) loola dhaqmo

Habka xogta warbixin-shaqsiyeedka Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) loola dhaqmo, waxaa u hogaansan Hab-maamuleed arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran [GDPR General Data Protection Regulation (Dataskyddsförordningen), iyo cutubka toddobaad ee arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ee bukaan-socodyada [DDL]. Xogta Diiwan-qarmeed tayada [Nationellt kvalitetsregister] ee Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP), waxaa la isticmaali karaa oo keliya horumarinta iyo sugidda tayada daawaynta dhibaatooyinka xiriirka la leh curyaanimada/naafo-maskaxeed, soo saarista tirokoob iyo cilmibaarista laamaha daryeelka caafimaadka/bukaanka. Xogta waxaa kaloo loo adeegsan karaa, kaddib markii la sugay xajinta sirta xirfadda, la siin karaa qof xogta u adeegsan doono sabab kamid ah saddexdaas. Markii xogta laysku daba-ridi doono kuma qorna Tobbanka lambar aqoonsiga ama magacyada, dhammaan wixii xog ah waxaa loo soo bandhigo doonaa qaab qarsoodi ku salaysan. Haddii xog laga soo saaran karo Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) waxaa loogu dhaqaaqi doonaa qaab farsamada elektroonikada ku salaysan. Wixii su'aallo ah oo xiriir la leh xuquuqdaada waxaad kala xiriiri kartaa Wakiilka arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran (Dataskyddsombudet).

Haddii aad doonayn inaad ka qayb gasho Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) wax xog ah lagama diiwan gelin doono diiwanka tayada.

Mas'uulka dhexe ee warbixin-shaqsiyeedka maaraynta xiriir la leh ururinta xogta ku saabsan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) waa Golaha Gobolka Skåne.

Warbixin-shaqsiyeedka wakiilka waxaa lagala xiriiri karaa adreeska: Region Skåne, Personuppgiftsombudet, 291 89 Kristianstad. Taleefan : 044-309 30 00.
Email: region@skane.se

Wakiilka arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran (Dataskyddsombudet) waxaa lagala xiriiri karaa Region Skåne, adreeska: Dastaskyddsombudet, Region Skåne, 291 89 Kristianstad. Taleefan: 044-309 30 00. Email: region@skane.se

Diiwan-hayaha waa Gunnar Hägglund, Waaxda daryeelka lafaha. Isbitaalka Skånes Universitetssjukhus. 221 85 Lund. Email: gunnar.hagglund@med.lu.se

Sirta

Warbixin-shaqsiyeedka waxaa loo suga hab waafaqsan Xajinta sirta xirfadda ee laamaha caafimaadka iyo daryeelka bukaanada [sjukvårdssekretessen] iyo Xeerka arrimaha guud iyo xajinta sirta xirfadda [Offentlighets- och sekretesslagen]. Taasoo macneheedu tahay in guud ahaan xogta diiwanka Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) laga soo saaran karo kaddib markii la hubsado, in qofka arrinta ay khuseeyso ama ehelkiisa dhibaato ugu iman karin bixinta xogta.

Ammaanka
Warbixin-shaqsiyeedka ka diiwan-gashan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) qof aan shaqo ku lahayn ma aqrisan karto. Dhinaca sugidda ammaankaa xogta waxaa u degsan shuruurdo u gaar ah, taasoo macneheedu ay tahay in hawlwadeneha xogta u baahan sidii u ku horumarin lahaa kuna sugi lahaa tayada daryeel-caafimaadeedka oo keliya ayaa xaq u leh in uu aqristo. Hab joogto ah ayaa loo kormeera in qof aan shaqo ku lahayn u aqristay xogta, waxaana ammaankeeda lagu suga iyadoo la adeegsanyo furo sir ah, waxaana lagu guda geli karaa oo keliya hab aaad u sugan.

Marin u helista
Hawlwadeneyaada ka hawlgala Guddi-goboleedka ammuuraha caafimaadka [Landstinget] oo wargeliya Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP), waxay marin u heli karaan xogta oo ay wargeliyaan diiwanka Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP). Ma jiro goob daryeel-caafimaadeedka kale oo toos u heli karo xogtaas. Maadaama haayaha diiwanka uu diiwaanka mas'uul ka yahay wuu aqrisan karaa xogtaas.

Yarayn
Kaddib go'aanka Hay'adda arkifiyada Gobolka Skåne, waxaa xogta loo kaydinayaa taariikh, tirokoob ama cilmibaaris awgood.

Xuquuqdaada

- Waa ikhtiyaari, waxaana xaq u leedahay inaad codsato in xogta ku saabsan aan laga diiwan gelin diiwanka tayada.
- Waxaad xaq ku leedahay inaad codsato in xogta kugu saabsan laga ciribtiro diiwanka tayada.
- Waxaad xaq ku leedahay in lagu wargeliyo xogta kugu saabsan ee ka diiwan gashan diiwanka tayada, iyo in lagu siiyo nuqul/koobi oo lcaga la ' aan ah, taasoo loo yaqaanno [registerutdrag]. Waxaad xaq ku leedahay in xogta lagu siiyo iyado elektrooniik ah.
- Waxaad xaq ku leedahay in lagu saxo haddii xoq aan sax ahayn la idinka qoray. Sidoo kale waxaad xaq ku leedahay in xogta qabyada ah la dhamaystiro.
- Haddii ay jirto xaalado gaar ah waxaad xaq ku leedahay in xogta adiga ku saabsan in xad loo yeelo. Tani waxay suurtagal noqon kartaa markii diidmo kale la qiimaynayo. Macnaha xadaynta waxaa weeyaan in maamulka diiwanka tayada usan waxba ka qaban karin xogta adiga kugu saabsan oo aan ahayn in u kaydsho.
- Waxaad xaq ku leedahay in lagu siiyo warbixin kub saabsan xarumaha daryeel-caafimaadeedka oo aqrisan karaa xogta ku saabsan iyo goorta, loo yaqaanno [loggutdrag].
- Waxaad xaq ku lahaan kartaa magdhaw haddii xogta adiga kugu saabsan loo maareeyo qaab aan waafaqsanatn Hab-maamuleed arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran [GDPR General Data Protection Regulation (Dataskyddsförordningen)] ama Xeerka arrimaha bukaan-socodyada [patientdatalagen].
- Waxaad xaq ku leedahay inaad u cabato Hay'adda Ilaalinta sharafta [Integritetsskyddsmyndigheten] oo ah hay'adda arrimahaan kormeerta.

Haddii aad u baahan tahay warbixin dheeraad oo ku saabsan Barnaamijka dabagalka curyaanimada/naafo-maskaxeed (CPUP) la xiriir:
Diiwan-hayaha Gunnar Hägglund
Waaxda daryeelka lafaha

Isbitaalka Skånes Universitetssjukhus. Lund
221 85 Lund

Haddii aad doonayso in diiwaanka xog lagaga soo saaro, codsiga oo qoraal ah u dir:
Personuppgiftsombudet
Region Skåne
291 89 Kristianstad
Sheeg magaca diiwanka iyo waaxda daryeel-caafimaadeedka ee warbixinta laga soo ururshay.
Qoraalka codsiga waa in hoos laga soo saxiixa

Haddii aad doonayso in xogta cunugga ku saabsan la ciribtiro la xiriir:
Personuppgiftsombudet
Region Skåne
291 89 Kristianstad
Sheeg magaca diiwanka iyo waaxda daryeel-caafimaadeedka ee warbixinta laga soo ururshay.
Qoraalka codsiga waa in hoos laga soo saxiixa

Haddii aad doonayso in lagu wargeliyo xog ku saabsan dadkii aqristay xogta cunugga la xiriir:
Personuppgiftsombudet
Region Skåne
291 89 Kristianstad
Sheeg magaca diiwanka iyo waaxda daryeel-caafimaadeedka ee warbixinta laga soo ururshay.
Qoraalka codsiga waa in hoos laga soo saxiixa